

xarunta  
adeega oo  
qaxootiga  
dhalinyarada ah

TAXANAHA HADALADA  
QAXOOTIGA  
DHALINYARADA AH



Kofinanziert von der  
Europäischen Union

Codkaaga wuxuu



# sameeyaa isbadel!

## Maxaan rabnaa?

Mashruuceena, waxaan rabnaa inaan wanaajino daryeelka dhalinyarada ee qaxootiga dhalinyarada. Wuxaan jeelaan laheyn inaan ogaano waayo aragnimada aad ku yeelatay daryeelka dhalinyarada, maxaa si wanaagsan u socdo oo maxaa kala duwanaan karaa.

## Maxaan kugu baahannahay?

Waad garaneysaa waxay u egtahay ku noolaanshaha daryeelka dhalinyarada sida qaxooti dhalinyaro ah. Wuxaad la kulantay inaan wax ka baran karno. Wuxaad haysaa fikradaha ee sida aan u hormarin karno daryeelka dhalinyarada. Adiga iyo fikradaada waa muhiim!

## Maxaad filan kartaa?

Wuxaan jeelaan laheyn inaan ku wehlino sadax sanno oo aad la yeelatid wada sheekeysi gaaban sannad walba. Wadahadalka waa inuu ku saabsanyahay waxaad kula kulantid daryeelka dhalinyarada/kooxdaada deegaanka iyo waqtiga daryeelka dhalinyarada kadib. Wadasheekeysiga wuxuu u dhici karaa qof ahaan, onleenka, telefon ahaan ama qoraal ahaan (tusaale ahaan sheekeysiga).

Waad go'aansan kartaa haddii aad rabtid inaad kala qeybqaadatid kaligaa ama dad kale. Sidoo kale waan ku faraxsannahay inaan bixino turjubaan.

## Yaa ka qeybqaadan karto?

Waad ka qeybqaadan kartaa,

- haddii aad ku nooshahay xarunta daryeelka dhalinyarada (tusaale ahaan kooxda deganaanshaha) ama aad dhawaan ka tagto daryeelka dhalinyarada iyo
- haddii aad ku nooshahay Rheinland-Pfalz ama Baden-Württemberg

## Sidee ayaad uga qeybqaadan kartaa?

- ✓ Waa inaad ahaataa ugu yaraan 14 sanno jir.
- ✓ Haddii aad jeelaan laheyd inaad ka qeybqaadatid, waad ogeysiin kartaa kormeerayaashaada ama si toos ah noola xiriir:  
**I-meelka:** info@servicestelle-junge-gefluechtete.de  
**WhatsApp / Signal / SMS:** 015566881097
- ✓ Ka hor wareysiga ugu horeeya, waxaan u baahannahay ogolaansho saxiixan iyo ku dhawaaqida illaalada xogta.
- ✓ Haddii aadan weli aheyn 18 sanno jir, wuxaad u baahaneyaa ku dhawaaqida ogolaanshaha ka imaanayo masuulkaaga.

Sabrina, Steffi und Anika

